Hanaanka
Adeegyada caafimaadka ee Fairview

Xeerka

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed

Ujeedo:
Adeegyada Caafimaadka ee Fairview iyo HealthEast (wadajir ahaan, “Fairview”) waxay leeyihiin taariikh dheer oo ah siinta daryeel caafimaad tayo leh bukaanada bulshadeena kamid ah iyagoo u eegeyn awoodooda dhaqaale. Fairview waxay aqoonsantahay in qaar kamid ah bukaanada aysan awoodi Karin bixinta dhammaan ama qeyb kamid ah kharashka caafimaadka muhiimka u ah adeegyada daryeelka caafimaadla la helo waayo ma laha caymiska caafimaadka ama kharashaadka daryeelka caafimaadkooda ayaa ka sareeya awoodooda dhaqaale. Si loo bixiyo Daryeel Samafal ama kaalmooyinka kale maaliyadeed eek u habboon kuwa u baahan, Fairview waxay leedahay hanaan ay ku qiimeyso u qalmashada bukaanka Daryeelka Samafal.

Xeerka Bayaanka: Fairview waxaa ka go’an hormarinta caafimaadka ee bulshada. Xeerkan wuxuu wax ka qabtaa qaybaha kala duwan uu ka koobanyahay Xeerka kaalmada maaliyadeed ee Fairview.

Faahfaahinada:

Caafimaadka Daruuriga
Daryeelka caafimaad ahaanta ee daruuriga ah waa daryeelka, fikrada Fairview la aqoonsaday dhakhaatiirta daaweyneyso/farmashiiyayaasha iyo sida waafaqsan heerka daryeelka, si xiliyeed ah ayaa loogu baahantahay:

- Si looga hortago bilowga ama ka darida jirada, xaalada, ama curyaannimada;
- Si loo ogaadi nooca cudur;
- Si loo siiyo daawada, daaweynta ama daaweynta soo celinta oo jir ahaan, dhaqan ahaan iyo/ama xaaladaha caafimaadka maskaxda; iyo/ama
- Si loo caawiyo shaqsiga in uu gaaro ama joogteeyo kartida shaqada ee sameynta howlaha joogtada ah, tixgelinta labadaba kartida shaqada shaqsiga iyo kartiyadaas shaqada ee ku haboon shaqsiyaadka isku dada ah.
- Caafimaad ahaan adeegyada daruuriga ah waxaa ku jiro adeegyada bukaan socodka iyo bukaan jiifka sida loogu xilsaaray Ciwaanka XIX ee Xeerka Amniga Bulshada Faderaalka, iyo adeeg walboo bukaan jiifka ama bukaan socodka ee isbitaalka ee ku daboolan oo loo tixgeliyay in uu yahay caafimaad ahaan muhiim sida waafaqsan Ciwaanka XVIII ee Xeerka Ammniga Bulshada Faderaalka. Intaa waxaa dheer, daryeelka ay bixisay xarunta isbitaalka iskaashiga ama LLC ee taas oo isbitaalka qabo raasumaalka ama danaha faa’iidooyinka waxay u qalantaa kaalmada dhaqaalaha. Adeegyada waa in lagu sameeyaa sida waafaqsan heerarka qaranka ee waxqabadka caafimaadka guud ahaan la ogolaaday xiliga adeegyada la bixiyay. Adeeg walba waa in uu ku filnaadaa tirada, muddada, iyo baaxada si macquul ah loogu gaaro ujeedadeeda.
- Caafimaad ahaan adeegyada daruuriga ah kuma jiraan adeegyada waxqabadka tijaabada ah ama muuqaalka dabiiciga ah.
- Xaaladaha kale ee taageerayo daaweynta daruuriga ee gaarka ah waxaa ku jira:
  - Marqaatiga sayniska tayada sareyso ee bukaanada xaaladaan gaarka ah qaba wuxuu ka faa’idada daaweynta la codsaday;
  - Nooca faa’iidada caafimaad ahaan muhiimka u ah; iyo/ama
  - Daaweyn kale oo ka jaban iyo dariiqyada lagu maaraynayo waa la tixgeliyay oo la diiday.

Waxqabadyada Tijaabada
Waxqabadka tijaabada waa daawayn iyo dhexgal waxqabadaysan oo gabi ahaanba ogolaata si badbaado ah oo wax ku ool ah qubarayaalka goobta ku haboon ee baaritaanka, ka hortaga ama daaweynta xaalada caafimaadka sida waafaqsan tixgelinta. Marka la go’aansanayo in waxqabadka uu yahay tijaabo, xaqiiqyada xigga way ku jiraan balse kuma koobna oo kaliya:

- haddii waxqabadka kaliya loo heli karo sida qeybta ka ah daraasada caafimaadka;
- haddii qoraalada quseeyo ay yihiin wacitaanka joornaalo dib loo eegay oo daraasada dheeraad ah ee waxqabadka xaalada caafimaadka sida waafqsan tixgelinta; ama

- haddii waxqabadka loo isticmaalayo aag kale oo jirka ah, oo si weyn u kala duwan, iyo/ama xaalad caafimaad kala duwan, kadib guud ahaan ayaa u ogolaadeen qubarayaasha kale ee goobta ku haboon [oo gudaha Fairview, the Twin Cities, Minnesota, the US, iwm.]

Culeyska Dhaqaalaha Aan la joogteyn karin
Xaalada halka ay jiraan qarash muhiim ah ee hay'ada ka reebida canshuurta Fairview si ay u siiso adeega iyo dhacdada baahidsa bukaan imaan karo ee adeega waa mida sida hay'ada aysan bixin karin isla adeega iyada oo aan laheyn lacag celin ku fillan ee dhammaan bukaanada la midka ah iyo ku haro masuuliyada lacag ahaan.

Qoyska
Ujeedooyinka xeerkaan, qoyska waa:

- Lamaane is qabo iyo ku tiirsanayaal walba, sida lagu qeexay tilmaamaha IRS.
- Shaqsiga leh ku tiirsanayaal sida lagu qeexay tilmaamaha IRS..
- Qof aan la qabin oo aan la heyn dad ku tiirsan.

Tilmaamaha saboolnimada waxay si gooni ah u quseyneysaa si gooni ah qoys walba oo qoyska ku jira haddii qoyska uu ku jiro wax ka badan hal qeyb oo qoys ah.

Bixinta Daryeelka
Fairview waxay bixineysaa tijaabada baaritaanada caafimaadka iyo xasalinta adeegyada ee xaaladaha caafimaadka degdega oo aan laga eegin kartida lagu bixinayo. (Eeg Qorshayaasha EMTALA [Xeerka Daaweynta Caafimaad ee Degdega iyo Shaqada] ee Fairview.)(2)

Fairview waxay bixisaa adeegyada aan degdegga aheyn ee, afkaarta la aqoonsaday Fairview oo ku amraya dhakhtarka, caafimaad ahaan waa muhiim. Fairview laga yaabo in ay u baahantahay in diyaarinada lacag bixinta waxaa loo aasaasay ku qanacsanaanta ka hor inta aan la bixin adeegyada aan degdegga aheyn. Diyaarinada lacag bixinta waxaa ku jiri karo kaashka ama lacag bixinta kaarka bangiga, caymiska sida gaarka ah loo ogolaaday Fairview, dhimis aan caymisneyn iyo, halka ay quseyso, kaalmada dhaqaalaha (daryeel la dhimay ama bilaash ah) waxaa ansixiyay Fairview. Adeegyada qaar waxaa laga yaabaa in aysan xaq u lahaanin kaalmada dhaqaalaha. Xaaladaha aan degdegga aheyn, Fairview waxay haysaa xaquuqda lagu eegayo dacwadaha gaarka ah ama codsiyada adeegyada gaarka ah ee lagu aasaasayo koorsada aadka ugu haboon ee daaweynta ka imaaneyso iyo aragtiyada anshaxa.

Qiimodhimista Caymis-laawaha (Isbitaalka Fairview)
Bukaanada isbitaalka ee helayo daaweynada aan la caymin sida lagu qeexay heshiiska Fairview iyo Xafiiska Qareenka Guud ka bilow Juun 22, 2012 ilaa Juun 22, 2017 ("Heshiiska") waxay xaq u lahaanayaan dhimista ("dhimista aan la caymin").

I. U qalmashada Qiimo dhimis:

A. Bukaanada caymis-lawayaasha ah waxaa la aqoonsan kahor diiwaangelinta, diiwaangelinta ama gelitaanka, ama xilliyada biilka iyo kharash uruurinta. Bukaanada caymis-laawayaasha ee leh dhakhli qoyseed u dhigma ama ka hooseeya $125,000 oo hela daaweynta caafimaad muhiimka ah waxay u qalmi doonaan qiimodhimista caymis-laawayaasha ee u dhiganta heerka bixiyaha dakhliga ugu sareeya heshiiska Fairview. Fairview ama qaybaha ganacsiga Fairview si ikhtiyaari ah waxaa laga yaabaa inay u fidiyaan qiimodhimis bukaanada leh dhakhli qoyseed ka sarreeya $125,000.

B. Kuwa Ka-reeban Qiimo dhimis:
1. Bukaanada aan daganayn Minnesota ama Wisconsin xilliga adeega uma qalmaan qiimodhimista caymis-laawayaasha.
2. Bukaanada hela boomaatada, baaritaanka loo dooqay ama adeegyada caafimaad ahaan muhiimka aheyn uma qalmaan qiimo dhimis caymis-laawayaasha.
3. Qiimodhimista caymis-laawayaasha waxay khuseeysaa kaliya adeegyada isbitaalka ama isbitaalka ku salaysan iyo isbitaalada loo doortay howlaha bixinta adeegyada. Bukaanada hela adeegyada caafimaadka bilaashka ah, adeegyada ay bixiyaan Fairview kuwaan aheyn, adeegyada ay bixiyaan hay'adaha Fairview kuwaasoo aysan daboolin Heshiiska Qareenka Guud iyo adeegyada aan isbitaalka laga helin ma heli doonaan qiimo dhimis caymis-laawaha.

II. Qiimo dhimis ilaa Qarashka lagugu Dallaco:

Heerarka qiimo dhimis waxaa sameeynaya billowga sanad kasta Madaxweyne Ku-xigeenka Maareynta Dakhliga.

Qiimo dhimis waxaa lagu saleyn doonaa sicirka celceliska magdhawga la siiyo bixiyaha dakhliga ugu sareeya Fairview ee isbitaalka ku saleysan.. Hogaanka Maaliyada goobta, Madaxweyne Ku-xigeenka Maareynta Dakhliga, iyo Madaxweyne Ku-xigeenka Wareegga Dakhliga ama wakiilkooda waa inuu oggolaadaa go'aamada ka baxsan tilmaamaha la sameeyay, iyadoo la raacayo dib-u-eegis dhamaystiran lagu sameeyay daruufaha la isku halleyn karo ee kiis kasta.

Kaalmada Maaliyadeed
Intaa waxaa dheer dhimista aan caymisneyn, Fairview waxay siiyaan kaalmada dhaqaalaha ee adeegyada xaqa u leh aasaasida daryeel la dhimay ama bilaash ah shaqsiyaadka buuxiyo u qalanka shuruuda. Daryeelka degdegga iyo adeegyada aan degdegga aheyn ee uu amray dhaqtarka la aqoonsaday ee Fairview, fikrada amrida dhakhtarka, caafimaad ahaan waa muhiim, waxay xaq u leeyihiin kaalmada dhaqaalaha, sida daryeelka ee ay ku bixiyeen xarunta isbitaalka iskaashiga ama LLC ee isbitaalka uu qabo raasumaalka ama danaha faa'iidooyinka.

Bixiyayaasha xisbiga sadexaad ee aan shaqaalaha aheyn ee gaarsiiyo gurmadka ama caafimaadka kale ee daruuriga ah xarunta isbitaalka waxay ku qoranyihiin lifaaqa Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha. Lifaaqa wuxuu sharaxayaa haddii daryeelka ay bixiyaan bixiyayaashaan waxay ku daboolantahay Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha.

Fairview waxay leeyihiin xaquuqda dib loogu eegayo codsiyada Kaalmada Dhaqaalaha ee adeegyada aan degdegga aheyn si loo sahmiyo daaweyno kale ama goobaha adeega iyo ma jiraan diidmada codsiyada Kaalmada Dhaqaalaha ee aasaasayo tixraaca aasaaska culeyska lacagta aan joogtada aheyn ee hay'ada.

Bukaanada daryeelka laga siiyo xarunta Fairview waxaa laga filanayaa in ay ku deeqaan qarashaadka daryeelkooda sida ku saleysan kartidooda lagu bixinayo. Fairview Kaalmada Dhaqaalaha ma ahan beddelka laoo shaqeeyaha kafaala qaaday, caymiska bulshada ama caymiska shaqsiga uu iibsaday. Si markaas loogu qalmo Kaalmada Dhaqaalaha, bukaanada waxaa laga filanayaa in ay:

- Helaan dooqyada caymiska bulshada ama gaarka ah taas oo ay u qalmaan, oo ay ku jiraan bixinta Fairview iyo macluumaad walba ama dhammaan macluumaad loogu baahanyahay diiwaangelinta barnaamijka caymiska ee ay bulshada ka faalo qaaday.
- U hogaansamiida sharuudaha codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, oo ay ku jiraan soo saarida waraaqaha lagama marmaanka ah.

U qalmista Kaalmada Dhaqaale
Fairview waxay ku saleysaa xaq u lahaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha daqliga qoyska iyo hantida. Foomka codsiga kaalmada dhaqalaha waa in ay la jirtaa foomka xaqiijinta ee dakhliga qoyska iyo hantida. Cadeynta la aqbali karo ee dakhliga iyo hantiyada waxaa ku jira kuwa xigga oo dhammaan xubnaha dadka weyn ee qoyska: Labo jeegaga ugu cusub ee joornaatiga, qoraalada muujinayo Maniga Bulshada, shaqo la'aanta, curyaannimada iyo faa'iidooyinka taageerada xaaska/carruurta, bangiga iyo qoraalada koontada dulaalka (oo kaash ahaan ah, IRA, badeecada, akoonada 401K), iyo soo noqadka canshuurta sannadkaan ugudambeeyo. Qoraalka daqliga ee codsadayaasha iskood u shaqeysto waa loo baahanyahay. Maqnaanshaha dakhliga, Ku dhawaaqida qoraalka Aan Dakhliga laheyn waa la ogolaanayaa.

Tilmaamaha dakhliga waxaa dib loogu eegayaa iyada oo la kaashanayo cusbooneysiinta Tilmaanta Saboolnimada Faderaalka ee ay daabaceen Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid. Tilmaamaha dakhliga ee xaq u lahaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha ee Fairview t waa sida soo socota:

Dakhliga qoyska waa sida socota % tilmaamaha saboolnimada federaalka	**% Qiimo dhimis guud kharashyada (ee Haraaga kadib Qiimoddhimista caymis-laawaha)**
0-200%	100%
201%-300%	50%

Tilmaamaha hantida ee xaq u lahaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha ee Fairview waa sida soo socda: Haddii qoyska leeyahay kaash/IRA/badeecada/401K hantida gaareyso $25,000 ilaa $500,000, ugu yaraan boqolkiiba toban (10) ee hantida la heli karo waa in ay quseysaa haraaga sabab la xiriirto Fairview ka hor inta qofka/qoyska uusan u qalmin kaalmada dhaqalaaha. Haduu raasimaalku dhaafo $500,000 uma qalmaan Kaalmo Maaliyadeed.

Fairview ma isticmaali doonto wax qiyaasid softaweerka xaq ulahaanshaha oo loogu ansixiyo ama loogu diido Kaalmada Dhaqaalaha. Bukaanada go'aansaday in uu helo xaq u lahaanshaha hadda ee Caawinta Caafimaadka ama MinnesotaCare (oo wadajir ah "MA"), haraaga bukaan walba ee la galo ka hor MA inta aysan dhagalin taariikhda xaq ayuu u lahaanayaa Kaalmada Dhaqaalaha.

Samaynta Codsiyada Kaalmada Maaliyadeed

- Fairview waxay siin doontaa la talinta dhaqaalaha bukaanada iyo qosyaskooda si loo caawiyo aqoonsiga dooqyada ku haboon ee buuxinta waajibaadyada dhaqaalaha. Bukaanada muujiyaa dhibaatada dhaqaalaha waxaa la siin doonaa codsiga Kaalmada Dhaqaalaha.
- Si loo codsado kalmaamada dhaqaalaha, qofka waa in uu buuxiyaa codsiga kalmaamada dhaqaalaha iyo keenaa waraaqaha loo baahanyahay ee la xiriiro dakhligadakhliga qoyska iyo hantida (fiiri hoos). Codsi Kaalmo Maaliyadeed ayaa si bilaash loo heli karaa iyadoo laga wacayo Adeega Macaamiilka HealthEast 651-232-1100 ama Adeega Macmiilka Fairview 612-672-6724. Kaalmo dhanka codsiga waxaa laga heli karaa adiga oo wacayo lambarkaan sidoo kale.

Bukaanka ee aan horay u tilmaamin awood la'aantalagu bixinayo wuxuu la xiriiri karaa Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka Fairview kadib helida biilka, ama Adeega Macmiilka ee Fairview kadib markuu helayo biilka, ama waxaa laga yaabaa la taliyaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka inuu la xiriiro. Wakiilada Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka waxaa loo gudbinayaa bukaanka shaqaale ku haboon si uu u codsado barnaamijyo walbaku haboon caawinta bulshada, iyo ka baaro bukaanka xaq ulahaanshaha kalmaamada dhaqaalaha. Kuwa xaq u yeelan kara kalmaamada dhaqaalaha waxaa la siin doonaa foomka codsiga.

- Foomamka codsiga dhameystiran waxaa loo gudbin karaa Isku-duwayaasha Daryeelka Samafalka.
- Haddii codsi aan dhameystirneyn lagu soo celiyo Fairview t, wacitaan taleefonka ah ayaa la sameynayaa iyo/ama warqad ayaa loo soo dirayaa xisbiga masuulka ka ah oo sharaxeyso waxa loo baahanyahay.
- Fairview waxay bixin doontaa ogeysiin qoran ee go'aan gaarka caawintooda ah 30 maalmood oo kaleendarka gudahood ee ka bilaaneyso helida codsiga Kaalmada Dhaqaalaha oo buuxo. Ogeysiiskan waxaa lagu dari doonaa heerka dhimista ee waafaqsan kartida bukaanka oo lagu bixinayo. Diidmooyinka waxaa lagu dari doonaa sababta diidmada iyo tilmaamaha nidaamka ee bukaanka ku codsan karo dib u tixgelin. Go'aaminta u qalanka Kaalmada Dhaqaalaha waa wax ku ool (waxay quseyn doontaa daryeelka la bixiyay ee haddii kale buuxiyo sharuudaha xeerkaan) oo 6 bilood ah iyada oo aan jirin baahida dib loogu codsanayo.
- Bukaanka wuxuu codsan karaa dib u tixgelinta go'aanka xaq ulahaanshaha ee kalmaamada dhaqaalaha Fairview isaga oo ku gudbinayo qoraal ahaan macluumaad dheeraad ah, sida xaqiijinta dakhliga ama sharaxaada xaaladaha cudurdaarka, ee ansixiye loo xilsaaray 30 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso ogeysiinta diidmada. Haddii diidmada hore ee xaq ulahaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha dib loo xaqiijiyo, ogeysiin qoran ayaa loo soo dirayaa xisbiga masuulka ah. Dabagalka aruurinta ee akoonada waxaa lagu joojinayaa dhinaca nidaamka dib u tixgelinta.
- Dhimista Kaalmada Dhaqaalaha waxay quseyneysaa haraaga akoonada la ansixiyay ee haray codsiga kadib ee dhimista aan caymisneyn haddii bukaanka xaq uleeyahay sida waafaqsan xeerarka Heshiiska. Kadib go'aaminta uqalmitaanka Kaalmada Dhaqaalaha, shaqsiga Kaalmada Dhaqaalaha uqalma laguma dallacayo in ka badan xaddiga guud ahaan lagu dallaco (AGB) shaqsiyaadka leh caymiska markay tahay daryeelka caafimaadka degdegga ah iyo kuwa caafimaad ahaan loo baahan yahay. AGB waxay xisaabisay isbitaal walba oo isticmaalayo qaabka gadaal eegida ee lacag celinta laga helay dhammaan koontada ganacsiga iyo Medicare ee sannad maaliyadeedka la soo dhaafay. Warqada macluumaadee sheegeyso tirada Fairview guud ahaan loo diray boqolkiiba laga yaabo in lagu helo bilaasha adiga oo kala xiriirayo HealthEast Adeega Macaamiisha 51-232-1100 Adeega Macaamiisha Fairview 651-232-1100.

Bukaanka ayaa masuul ka ah wixii haraa haray kadib dhimista Kaalmada Dhaqaalaha la codsado. Haddii haraaga aan lagu bixin waqtiga la sheegay, akoonka waxaa lagu gudbinayaa dhinaca nidaamka aruurinta caadiga, taas oo lagu sheegay Biilka HealthEast ama Fairview iyo xeerka Aruurinta, ee laga heli www.Healtheast.org or www.Fairview.org Fairview Fairviewma u ansixiso ama u ogolaato wakiiladeeda in ay ka qeybgalaan xadgudub ama dhaqamada aruurinta sharci darada ah.

Daabacaada Kaalmada Dhaqaalaha La heli karo

Fairview waxay bulshada ay ogaysiin doontaa xeerkooda Kaalmada Dhaqaalaha qaabab kala duwan, sida daabacadaha xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, foomka codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, iyo dulmarka luuqad cad ee xeerka Kaalmada Dhaqaalaha oo websaydka HealthEast ama Fairview ((www.Healtheast.org ama www.Fairview.org), oo ay ku jiraan dulmarka luuqad cad ee xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee buuga Macluumaadta Bukaanka isbitaalka, la sameynta korontada (ogolaanshaha bukaanka) ama qoraalada la daabacay

ee loogu heli karo bukaanada ee goobaha bulshada ee isbitaalada ama boosta ahaan ama i-meel (iyo ogolaanshaha bukaanka), ilaa ay ka muuqdaan bandhigyada bulshada ee qolka degdeg ah ee isbitaalka iyo aagaga ogolaanshaha, iyo qoraalada biilka bukaanka. Fairview ayaa ogeysiin doonta oo ogeysiin doonta xubnaha bulshada ee ay u adeegaan Fairview ee ku saabsan xeerkooda Kaalmada Dhaqaalaha ilaa websaydka HealthEast, joornaalada, iyo iyada oo loo qeybinayo koobiyada buugyaraha Kaalmada Dhaqaalaha ee xubanah bulshada oo qaab Xarumaha HealthEast.

Beddelida Daryeelka Samafalka/Kaalmada Dhaqaalaha

Fairview laga yaabo in ay goaansato in aysan ka raadin lacag bixinta haraaga koontada bukaanka sida ku saleysan awood la'anta lagu bixinayo aasaaska ee dhinaca nidaamka aruurinta caadiga. Marka go'aankaahan in la raadiyo lacag bixinta ku saleysan dhibaatada dhaqaalaha bukaanka, haraayadaan waxaa dib u beddelo Fairview sida Kaalmada Dhaqaalaha ama daryeelka samafalka, iyo ansixinta Nidaamka Agaasimaha Wareega Dakhliga ama wakiilka.

Qarashaadka Xad dhaafka ka ah Lacag celinta Dowlada

Qarashaadka aan la magdhabin ee ka imaanayo Medicare, Medicaid iyo gobolka/barnaamijyada daryeelka saboolka deegaanka waxaa loogu daray sida faa'iidada bulshada sababtoo ah kala duwanaanshaha muhiimka ah ee u dhaxeeyo qarashaadka dhabta ah iyo lacag celinta.

Barnaamijka Daryeelka Samafalka

- Lifaaqa A wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya u qalmashada Daryeelka Samafalka.
- Lifaaqa B wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya Ka Been-abuurka macluumaadka.
- Lifaaqa C wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya iskaashiga iyo isticmaalka caymiska.
- Lifaaqa D wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya ka-reebida Daryeelka Samafalka.
- Lifaaqa E wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya ikhtiyaarada kale qiimo dhimis.
- Lifaaqa F wuxuu ka koobanyahay macluumaad dheeraad ah oo quseeya biilasha iyo uruurinta kharashaadka.

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed
Lifaaqa A

U qalmashada Barnaamijka Daryelka Samafalka

- Kaliya adeegyada degdega iyo caafimaadka muhiimka u ah ayaa u qalma Daryeelka Samafalka. Fairview ayaa leh xuquuqda go'aamin ee kiisaska-ku-salaysan hadii adeegyada buuxiyaan qeexidda "caafimaadka u muhiim ah" ujeedadeedu tahay u qalmida Daryeelka Samafalka.
- Si aad uu ugu qalmo Daryeelka Samafalka, bukaanku waa inuu buuxiyaa tilmaamaha soo socda ee kharashka iyo raasumaalka:
    1. Heerka Dakhliga: Dakhli qoyseedka guud ee bukaanka waa inuu ahaado ama ka hooseeyo Kharashka la Go'aamin Doono (TBD) ee Heerka Saboolnimada Federaalka (FDL).

Xaddiga Dhakhliga ee Tirada Qoyska

Tirada Qoyska	Dhakhliga Guud ee Sanadlaha (200% FPL)	Dhakhliga Guud ee Sanadlaha (300% FPL)
1	$24,280	$36,420
2	$32,920	$49,380
3	$41,560	$62,340
4	$50,200	$75,300
5	$58,840	$88,260

    2. Tilmaamaha hantida ee xaq u lahaanshaha Kaalmada Dhaqaalaha ee Fairview waa sida xigta: Haddii qoyska leeyahay kaash/IRA/badeecada/401K hantida gaareyso $25,000 ilaa $500,000,, ugu yaraan boqolkiiba toban (10) ee hantida la heli karo waa in ay quseysaa haraaga sabab la xiriirto Fairview ka hor inta qofka/qoyska uusan u qalmin kaalmada dhaqalaaha. Haduu raasumaalka dhaafo $500,000, uma qalmaan Kaalmo Maaliyadeed.

    3. Faahfaahino ku saabsan dokumentiyada la isaga baahanyahay to aad u xaqiijiso dakhliga iyo raasumaalka waxaa laga heli karaa qeybta ka hoose "Hanaanka Codsiga".

- Xisaabinta Dakhliga:

- Dadka waaweyn, ereyga “Dakhliga Guud ee Sanadlaha” ee ku yaala Codsiga Daryeelka Samafalka waxaa loola jeedaa isku-geynta dakhliga guud sanadlaha ee codsadaha iyo xaaska codsadaha ee dhamaan ilaha. Haduu codsaduhu yahay saqiir, erayga “Dakhliga Guud ee Sanadlaha” waxaa loola jeedaa isku-geynta dakhliga guud ee waalid (iinta) codsadaha iyo/ama mas’uulka sharciga. Caddadka “Dakhliga Guud ee Sanadlaha” ee loo isticmaalo Codsiga Daryeelka Samafalka waxaa loola jeedaa dakhliga sanadlaha la diiwaangeliyay ee 12 billood. Ugu yaraan xaqiijinta dakhliga ee 3 billood ugu dambeysay ayaa lagaa codsan doonaa si ay u fududayso xisaabinta dakhliga sanadlaha ee hadda. Haddii xaqiijinta dakhliga 3 billood ee ugu dambeysay diyaar aheyn, bukaanka ayaa looga baahanyahay inuu keeno dakhliga sanadlaha ugu dambeeyay oo diiwaangashan. Daryeelka Samafalka lama oggolaanayo hadii bukaanka ka helo magdhow dhakhaale seddexeeye la xiriira daryeelka ay bixiyaan Fairview ku filan inuu daboolo dalabaadka daymaha maadaama lacagtaas la rajaynayo in loo isticmaalo gudida baaqiga Fairview ku leedahay bukaanka. Bukaanka codsanayo Daryeelka Samafalka wuxuu wargelinayaa tirada dadka ee qoyskiisa si loo go’aamiyo inta qoyska ka koobanyahay, dakhliga, iyo raasumaalka sida soo socota:

  Dadka Waaweyn: Si loo xisaabiyo tirada dadka ee qoyska Codsadaha qofka weyn ah, Fairview waxay ku daraysaa codsadaha, xaaska codsadaha iyo dhammaan dadka sharciyan ku tiirsan.

  Ilamaha: Si loo xisaabiyo tirada dadka ee qoyska codsadaha ilmaha, Fairview waxay ku daraysaa codsadaha, aabaha/wakiilka codsadaha, hooyada/wakiilka codsadaha iyo dhammaan dadka sharciyan ku tiirsan aabaha, hooyada ama canuga.

  Waalidiinta iskula noolyihiin hal guri cunugooda qaangaarka ah laguma darayo tirade qoyska ama dakhliga cunugaas illaa wakiilnimo sharciyaysan/muxaafadnimo laga cadaynayo iyadoo loo marayo dokumeenti rasmi oo sharciyaysan.

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed
Lifaaq B

Macluumaad Been Abuur ah

- Macluumaad Been Abuur ah:
    - Macluumaad Been Abuur ah ama diiditaanka iskaashi aad la yeelato Fairview iyadoo codsiga loo marayo waxay sababi kartaa diidmada Codsiga Daryeelka Samafalka. Haddii, marka codsiga Daryeelka Samafalka la oggolaado kadib ay Fairview ogaato macluumaadka codsiga Daryeelka Samafalka aad bixisay ay dhab aheyn, Daryeelka Samafalka iyo Daryeel samafal kasta ee laguu oggolaaday waa lagaala noqon sida ku cad go'aanka xorta ee Fairview.

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed Lifaaqa C

Iskaashiga Barnaamijka Daryeelka Samafalka iyo Isticmaalka Caymiska

Maadaama Barnaamijka Daryeelka Samafalka uu beddel u aheyn mas'uuliyadda shaqsiyadeed, shaqsiyaadka raadsanaya kaalmo maaliyadeed iyagoo u maraya barnaamijka waxaa laga filanayaa inay iskaashi ka sameeyaan nidaamka Fairview ee lagu go'aamiyo u qalmashada iyo inay ku biiriyaan kharashaadka adeega illaa heerka awood shaqsiyadeed. Fairview waxay ku dhiirogelinaysaa shaqsiyaadka leh awood maaliyadeed inay caymiska caafimaadka yeshaan si ay u hubiyaan inay helaan adeegyada caafimaadka oo la difaaci karo iyo inay difaacaan raasumaalkooda shaqsiyadeed. Dhammaan bukaanada waa la baarayaa waxaana laga rabi doonaa inay codsadaan caymiska MNsure for Medicaid, MinnesotaCare, Qorshaha Caafimaadka Aqoonta u leh iyo nooc kasta caymis ee daryeel caafimaad sida ku cad Xeerka Daryeelka La-awoodi Karo (ACA) si loogu qaato mid iskaashi ogol, Haddii uu u qalmo.

- Haddii uu bukaanka u qalmo il-dhaqaale ee saddexaad iskaashina samaynin uuna jiro qiil bukaanka ka wayn uu xaddidi Karin, bukaanka waxaa looga baahanyahay inuu soo gudbiyo warqad sharraxaad ah. Warqada waxaa dib-u-eegis ku sameyn doonaa maamulka Fairview.
- Bukaanka uma qalmi doona Daryeelka Samafalka ama KaalmadaBarnaamijka Kaalmada Maaliyadeed kale ee Fairview haduu bukaanka leeyahay damaanad-qaade saddexaad uuna usoo gudbinin macluumaadka damaanad-qaadaha Fairview inta lagu jiro wakhtiga saxda taasoo sababi karta diidmada Fanview.
- Guud ahaan, haduu doorto bukaanka inuu qaadan caymis isagoo u maraya adeegsada heeda/hiisa haduu diyaar yahay, uma qalmi doonaan Daryeelka Samafalka. Waa inay codsadaan iyagoo u maraya caymiska MNsure for Medicaid, MinnesotaCare, amaQorshaha Caafimaadka ee u qalma.
- Haduu bukaanka doorto inuu isaga/iyada isku qorin biilka caymiska isagoo hannaan gooni ah ama taariikhda adeega raacaya, booqashadaas uma qalmi doonto Daryeelka Samafalka.

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed Lifaaqa D

Barnaamijka Ka reeban Daryeelka Samafalka:

Barnaamijyada Daryeelka Samafalka ee Fairview iyo Qorshayaasha kale Daryeelka Samafalka ma daboolaan kuwa soo socda:

- Bukaanka aan raacin hanaanka codsiga Daryeelka Samafalka waxaa loo diidi doonaa Daryeelka Samafalka.
- Haduu koontada bukaanka uusan bixin caymiska shirkada, Daryeelka Samafalka waa loo diidayaa haduu codsadaha iskaashi la samayn waayo buuxinta qaansheegashada ama ka uruurinta saddexeeyaha suurogalka ah.
- Adeegyada laga helo bixiyayaasha aan ahayn Fairview, bixiyayaasha kale Fairview ma daboolo caymiskan.
- Adeegyada laga bixiyo Xarumaha Caamifaadka Degdega Fanview.
- Kharashaadka khuseeya gaadiidka ama kharashaadka nolasha shaqsiga.
- Kharashaadka qalliinka xubnaha ee la galo kolka tallaalka xubnaha ilaa hal sanno kadib tallaalka xubnaha bukaanada uma qalmaan Qiimo dhimista Daryeelka Samafalka. Tallooyin kasta oo ku saabsan dib-u-habbaynta kharashaadkan waa inay maraan hanaanka Ka reeban Dhaqaale.
- Muwaadiniinta aan u dhalan Maraykanka ama Muwaadiniinta u dhashay Maraykanka ee ku nool meel ka baxsan Maraykanka uma qalmaan Daryeelka Samafalka; kuwani waxaa kujira bukaanada fiisaha haysta iyo ardaynimada caalamiga ah. Tani kuma jirto dadka aan diiwaangashanayn ee ku nool Maraykanka.
- Rugaha Caafimaadka Bilaashka ee Fairview ma howlgalaan Kaalmada Caafimaadka gobolka la'aanteed. Sidaas daraadeed, bukaanada haysta kharashaadka bilaashka ee rugta caafimaadka oo haysta caymiska Medicaid ee dhacay uma qalmaan Daryeelka Samafalka.
- Adeegyada ay bixiyayaasha caymiska u tixgeliyaan kuwo aan la daboolin ilaa aan loo tixgelinin daryeelka caadiga ah.
- Iyadoo loo sababaynayo dabeecada tafaariiqda ganacsiga, Qalabka Caafimaadka Guriga ee Fairview iyo Adeegsiga Qalabka iyo gacan-ku-samayka ma daboolayo caymiskan.
- Daryeelka Guriga Fairview, Shaybaarka Fairview iyo Gaaritaanka Fairview waxay leeyihiin qorshooyin gooni u ah ee Daryeelka Samafalka lagumana daboolo Xeerkan.
- Goobaha xiriirka la leh Fairview kuwaasoo ah shirkado kala gedisan aana ku qasbanayn Xeerkan, soda, balse aan ku ekeyn, Fairview Maple Grove Ambulatory Surgery Center, iyo Crosstown Surgery Center.
- Adeegyada xirfadeed ay bixiyaan hay'adaha aan ahayn Fairview ma daboolayo barnaamijkan.

Xeerka Kaalmada Maaliyadeed
Lifaaqa E

Barnaamijka Daryeelka Samafalka –Ikhtiyaaraadka kale qiimo dhimista

- Ka-reebista Dhaqaale
  - Maamulka Fairview ee la qoondeeyay waa inuu qiimeyaa dhammaan ka-reebista si loo xaqiijiyo awooda kharash bixineed ee bukaanka. Kaliya kiisaska ka-reebitaan ee khuseeya bukaanka aad haysan ilo dhaqaale ay isaga bixiyaan waa in laga howlgalaa loogana warbixiyaa sida Daryeelka Samafalka. Dhammaan kiisaska waa in laga howgalaa loogana warbixiyaa sida dib-u-habbaynta maamulka aanan looga macluumaad sida Daryeelka Samafalka ama Deyn xumaatay, sida lagu qeexay tilmaamaha gobolka ama federaalka. Codsadaha kor u dhaafa tilmaamaha FDL laguna leeyahay deyn caafimaad kor u dhaafaysa dakhliga guud ee qoyska sanadkii tegay waa loo oggolaan karaa inuu codsado Daryeelka Samafalka iyadoo loo marayo Ka-reebitaanka Dhaqaale.
- Wada-howlgalayaasha Sare:
  - Wada-hawlgalayaasha Sarre Fairview waa iskaashi ka dhexeeya Fairview iyo Bulshada Sarre Adeegyada. Fairview waxay oggolaatay iska-dhaafida isla-caymiska iyo ka-jarrida kharashka isbitaalka iyo rugta ganacsiga. Xubnaha barnaamijkan waxay fahamsanyihiin inay mas'uul ka yihiin waxyaabaha uu daboolin caymiska Medicare, sida daawooyinka guryaha loo qaato. Isku-duwaha Daryeelka Samafalka waa inuu akoonada dib-u-habbeeyaa. Qadarka laga qaado caymiska Medicare waa inuu ka bataa dib-u-habbaynta Daryeelka Samafalka.
  - Codsiyada diiwaangelin
    - Dhammaan codsiyada loo diro ayna ka howlgalaan Bulshada Sarre Adeeyada ama Xafiisyada ku yaal Degmada Banaankeeda. Bukaanka waxay weydiisan karaan codsi ama macluumaad iyagoo wacaya 952-767-0665 ama booqanaya www.seniorcommunity.org.
    - Waxaa jira $42 ujuuro sanadle ah ay bxiyaan codsiyada la aqbalay.
  - Shuruudaha Uqalmitaanka
    - Bukaanka waa in laga diiwaangeliyaa caymiska Medicare qaybta A iyo qaybta B waa inaan laga diiwaangelinin qorshe beddel.
    - Aanan qaadan karin nacfiga Medicare
    - Dakhliga waa inuu ka sarreyn 200% FPL.
    - Raasumaalka waa inay dhaafi Karin $47,100 (ka baxsan hal guri iyo gaari)
- Daryeelka Safalka Gadaale/Daryeelka Samafalka Caafimaad ahaan loo Dulqaadan Karin.
  - Haduu bukaanku leeyahay MA ama MinnesotaCare ayna dhammaan adeegyada hore daboolin MA/ MinnesotaCare, akoontada kasta la qarash gareeyay kahor oggolaanshaha taariikhda MA wuxuu u qalmi karaa Daryeelka Samafalka haddii bixinta dabiiciga hooseeyso sida ku cad caawiyaha Kaalmada maaliyadeed.
- Qiimo dhimis Caymis-laawaha
  - Marka laga soo tago barnaamijyada diyaarka ee hoostaga Xeerka Kaalmada Maaliyadeed, dadka aan caymiska haysan ee degan Minnessota waxay u qalmi karaan qiimodhimis caymis-laawaha adeegyada isbitaalka kahor codsiga qiimo dhimista Daryeelka Samafalka. Qiimo dhimistan waxay ku salleysantahay Heshiiska Heerka Qarash Uruurinta Qareenka Guud mana ahan banaamij daryeelka salafalka.

Xeerka Kaalmada Maaliyada Lifaaqa F

Biilasha iyo Uruurinta Kharashaadka.

- Fairview waxay leedahay biilasha iyo kharashaad uruurin duwan taasoo diyaar ah iyadoo loo marayo shabakada website www.Healtheast.org or www.Fairview.org ama adigoo wacaya Adeega Macmiilka Fairview 612-672-6724 ama 1-888-702-4073 ama Adeega Macmiilka HealthEast 651-232-1100. Xeerkani waxaa kujira macluumaad khaas ah oo ku saabsan:
    - Hanaanka Biilka: Fairview waxay bixin doontaa qoraalo biilka ah sida uu qabo jadwalka wakhtiyaysan wuxuuna bixin doonaa ugu yaraan 120 maalin laga bilaawo biilka ugu horeeya booqashada koowaad inta ay billaaban uruuurinta caadiga ahayn ee xisaabaadka.
    - Xallinta Xisaabaadka. Fairview waxay bixin doontaa ugu yaraan 240 maalin lagu xalliyo xisaabaha furan iyadoo loo marayo ikhtiyaaraad badan, sida aqoonsiga uqalmashada caymiska ama Kaalmada caafimaad, isku-dubaridka lacag bixinta, daryeelka samafalka ama qaabab kale.
    - Howlaha Kharash Uruurinta: Haday dhacdo inaan lacagta la bixin, Fairview waxay u duwaysaa xisaabaha hay'adaha lacag uruurinta iyo/ama haya'adaha sharciga lacagaha qaada si loo dabogalo. Fairview waxay siin doontaa bukaanka ogeysiin ugu yaraan 30 maalin ah kahor billowga tallaabooyinka caadiga ahayn ee xisaabaha.

Tixaalka Bixiyaha Adeega

- Fairview waxay heestaa taxaal kooxaha bixiya adeega kaasoo siinaya bukaanada ku sugan xarumaha Isbitaalada Fairview adeegyada degdega iyo caafimaadka u muhiimsan. Taxaalka wuxuu aqoonsanayaa bixiyayaasha uu daboolo ama daboolin Xeerka Kaalmada Maaliyada ee Fairview (eeg lifaaqa) www.fairview.org/providerlists ama https://www.healtheast.org/images/stories/billing/covered_providers.pdf

Oggolaashaha Heshiiska:
Xarunta Caafimaadka Fairview Lakes way qaadatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka Fairview Northland way qaadatay Xeerkan.
Isbitaalka Fairview Ridges wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka Fairview Southdale wuu qaatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka Jaamacada Minnesota, Fairview way qaadatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast St. John wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast St. Joseph wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast Woodwinds wuu qaatay Xeerkan.
Isbitaalka HealthEast Bethesda wuu qaatay Xeerkan.
Xarunta Caafimaadka HealthEast iyo hay'adaha kale ka reeban Canshuurta way qaateen Xeerkan.
Kooxda Caafimaadka Fairview way qaateen xeerkan.

Xeerka Milkiilaha:
Madaxweyne Ku-xigeenka Wareega Dakhliga

Waxaa Ansixiyay:
Guddiga Agaasimayaasha Fairview

Taariikh (aha):

Taariikhda Dhaqangalida: 2-18-07, Guddiga Ansixiyay

Beddeleda– Qorshayaasha Dhaqaale Guddiga Qaybta Daryeelka Bulshada ee Adeega Bukaanka ku taariikhaysan 12-16-04

Taariikhda Muraajacada: 2/1/15; 12/1/15; 12/29/2015; 1/29/2016, 7/24/2017

Taariikda Dib-u-eegista: Guddiga Fairview ayaa Dib-u-eegis iyo Dib-u-ansixin ku sameeyay: 4/16/15, 6/17/16, 8/17/17

Taariikhda Dib loo Saxay: 6/1/15, 6/17/16, 11/1/17